

Dhibaato ma ku qabtaa bixinta qarashka adeegyada gurigaaga?



Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino.

Seattle Public Utilities (SPU, Waaxda Adeegyada Dadwaynaha ee Seattle) ayaa og in aafada cabauqa COVID-19 ay ku adkaysay qaar kamid ah macaamiisheena inay iska baxshaan qarashka adeegyada aasaasiga ah. Waxaan halkan u joognaa in aan ku caawino. SPU waxay leedahay ilaha caawimaada dhaqaalaha oo kaladuwan lana heli karo.

Qorshayaasha Lacag bixinta: Bixi waxaad awoodo hadda inta kalana gadaal ka bixi

Markay isticmaalaan qorshaha lacag bixinta, macaamiishu waxay kala qaybin karaan biilashooda SPU oo ay ka dhigayaan qaybo yaryar kadibna qayba mar ayay iska bixin karaan ayadood kharashaadka la daahin. Waxaan kaala shaqayn doonaa dajinta qorshe kaasoo ku haboon dakhligaaga.

► Dookhyada Qarash Bixinta Kala duwan

Si looga jawaabo aafada caabuqa COVID-19, waxaan joojinay shardigii qasabka ka dhigaayay in la baxsho 50 boqolkiiba qarashka si loo abuuro qorshe qarash bixin waxaana laba jibaarnay waqtiga macaamiishu haystaan si ay u buuxshaan mudada dhiibista qarashkooda oo ahaa 60 maalmood haddana aan ka dhignay 120 maalmood.



Seattle
Public
Utilities

Maanta Nasoo wac
206-684-3000

Ka fiiri bogga kale faahfaahino dheeraad ah

Barnaamijka Qiimo Dhimista Adeegyada Guriga: Qiima dhimis dhan 50-60 boqolkiiba qarashaadka oo loo samaynaayo macaamiisha u qalma dakhli ahaan

City of Seattle Utility Discount Program (UDP, Barnaamijka Qiimo Dhimista Adeegyada Guriga ee Magaalada) ayaa siinaaya caawimaad dhanka qarashaadka ah dadka waayeeelka ah, dadka naafada ah, iyo macamaisha danyarta ah. Macaamiisha dakhli ahaan u qalma ayaa helaaya qiimo dhimis dhan 60% oo ku aadan qarashka Seattle City Light iyo qiimo dhimis dhan 50% oo looga jaraayo qarashaadka SPU.

► Diiwana gelinta fudud, ee Oonleenka ah ee UDP

Si looga jawaabo aafada COVID-19, Magaalada Seattle waxay ka dhigta mid boobsiis ah oo fudud in la codsado barnaamijka UDP ayadoo la adeegsanaayo foomka diiwaan gelinta oonleenka ah. Maanta oonleen uga codso barta seattle.gov/utilities/CovidHelp.

Barnaamijka Caawimaada Xaalada Degdega ah: Waxaa lagu caawinayaa lacag dhan \$448 oo laga dhimaayo qarashaadka lana siinaayo macamiisha u qalma

Macaamiisha guryaha dagan ee dakhli ahaan u qalma ayaa heli kara caawimaad laga siinaayo qarashka adeegga guriga si dhakhso ah ayadoo lagu siinaayo the Emergency Assistance Program (EAP, Barnaamijka Caawimaada Xaalada Degdega ah). Haddii aad u qalanto EAP, waxaad heli kartaa lacag dhan \$448 oo ku aadan kharashaadka adeegyadaada guriga.

Macaamiisha qaar oo ka qoran Barnaamijka Qiimo Dhimista Adeegyada Guriga ayaa sidoo kale u qalma caawimaada kharashaadka degdega ah. Wac si aad u hesho xog dheeraad ah.

Maanta nasoo wac si aad ugu diyaar garowdo mustaqbalka.

Sabab la xariirta aafada COVID-19, waxaa la hakiyay jarista adeegyada iyo lacagta ganaaxa lasoo daahida qarashka.

Laakiin maadaama xaaladuhu dib ugu laabanayaan sidii caadiga ahayd, sidoo kale ayay nidaamyadeena qarash qaadistuna caadi ugu laabanayaan. Inaad dhiibto waxaad awoodo maanta waxay ka dhigaysaa biilkaaga mid fudud ood hadhoow iska wada bixin karto. Waxaan diyaar u nahay inaan kaa caawino qarashaad dheeraad ah ama adeeg jaris kugu dhacda mustaqbalka.

Maanta nasoo wac. Adeegyada turjumaada ayaa la heli karaa.



**Seattle
Public
Utilities**